

Ministerie van Sociale Zaken en Werkgelegenheid

# Waa ku cusub tahay Nederland

## *Shaqaalaha ajaanibta, magangelyodoonka, dadka reerka noqday iyo dadka reerka loo keenay*



Waxaad ka timid waddan ka baxsan Yurubta midowday? Kamana imaanin Liechtenstein, Noorwey, Ijsland, Kroatiga ama Swiiska? Markaa qoraalkan adaa laguugu talo galay.

**Ku soo dhawoow Nederland. Waxaa ku qoran qoraalkan waxa aad sameyneyso isla markii Nederland soo gasho. Maxey yihiin xaquuqdaada iyo waajibaadkaada shaqaale ahaan ama ganacsade. Iyo nidaamka iyo caadooyinka ku qusey-naaya marka aad Nederland degan tahay.**

**Waxaan isku dayeynaa inaan wixii warbixin jiraa dhan inaan kugu siino qoraalkan. Ma dooneysaa inaad arrin wax dheeraad ka ogaataa? Fiiri websaaytka mawduucaasi ka hadlaaya. Qoraalka ma waxaad ka aqrineysaa online-ka? Markaa waa inaad keliya link-ga aad riixdaa. waxaad dabcan wici kartaa telefoon nambarka mawduucasi ku qoran.**

**Iska fiiri: badiyaa websaaytyada waxey ku qoran yihiin luqada Nederlaanka. Maku qoran yahay websaaytka warbixin luqad kale ah? Markaa mar walba waan muujineynaa. Ma wacaysaa telefoon nambarada mid ka mid ah? Markaa badiyaa waa Inglishka.**

**Xaaladaha dhibaato markey jirto waxaad dabcan la xariiri kartaa safaaradda waddankaaga ee Nederland.**

# Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| **Ka hor intaadan Nederland imaanin** | **4** |
| Weydiiso fiiso ama deganaansho | 5 |
| Ha kuu sameeyo qofka shaqada ku siinaaya fasaxa shaqada ama GVVA kuu dalbo | 5 |
| **Maxaa la doonayaa inaad sameyso markaad imaado Nederland** | **6** |
| Xadido mudada aad Nederland joogeyso | 7 |
| Is qoritaanka qof degan ilaa muddo (aan toos u deganayn) Nederland | 7 |
| Is qoritaanka qof degan (toos u degan) Nederland | 7 |
| Waxaad yeelaneysaa BSN-nambar ah | 7 |
| Waxaad sameysaneysaa cinwaan deganaan | 7 |
| Waxaad sameysaneysaa ceymiska caafimaadka | 8 |
| Waa inaad sameysaa la qabsashada (inburgeren) | 8 |
| Waa inaad luqada Nederlaanka barataa | 8 |
| Caawinaaad iyo talo oo luqadaada ah? | 9 |
| **Ka shaqeynta Nederland** | **10** |
| Maxaad u baahan tahay markaad Nederland ka shaqeyneyso? | 11 |
| Shahaadooyinka waddanka kale | 11 |
| Sharuudaha shaqaalaha | 11 |
| Heshiiska shaqaalaha | 11 |
| Cao | 12 |
| Mushaharka ugu yar | 12 |
| Saacadaha shaqada | 12 |
| Meesha shaqada oo ah mid amaan ah | 12 |
| Qofka shaqada ku siinaaya ma yahay qof la aamini karo? | 12 |
| Bixinta canshuurta | 13 |
| Shaqadaada ma kaa dhamaatay/weydey? | 13 |
| Ma jiratay ama shaqo gab ma tahay? | 13 |
| Maxey sameeyaan ururada shaqaalaha? | 14 |
| Markaad u shaqeyneyso ganacsade ahaan | 14 |
| **Deganaanshaha Nederland** | **16** |
| Mar walba heyso cadeynta aqoonsigaaga | 17 |
| DigiD | 17 |
| Guri inaad hesho | 17 |
| Wadida baabuurka Nederland | 18 |
| Gaadiidka dadweynaha ee Nederland | 18 |
| Caruurta | 19 |
| Ceymiska caafimaadka | 20 |
| Daryeelka caafimaadka | 21 |
| Canshuuraha | 21 |
| Qarashka dheerida iyo waxa laguu soo celinaayo | 21 |
| Dadka oo si kala duwan loola dhaqmo ama midabtakoor | 22 |
| **Warbixin dheeraad iyo caawinaad** | **23** |



# Ka hor intaadan Nederland imaanin

## Weydiiso fiiso ama deganaansho

*Ma joogeysaa wax ka yar 90 beri?*
Markaa waxaad weydiisaneysaa fiiso joogis gaaban. Markaa weydiiso fiiso safaaradda ama qunsulka Nederland ee wad-dankaaga. Qof walba uma baahna fiiso. Fiiri ind.nl websaaytka Waaxda socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst).

*Ma joogeysaa wax ka badan 90 beri?*
Markaa waxaad weydiisaneysaa deganaansho iyo fiiso aad ku soo gasho oo hal ah. Fiisada ku soo gelitaanka waxaa la yiraahdaa Wakiilasho deganaansho muddo ah mvv (Machtiging tot Voorlopig Verblijf). Tani waa dacwada lagu soo galo iyo lagu joogo (TEV) mvv la'aanteeda laguuma ogolaanaayo inaad Nederland soo gasho. Taasi waxaa loo maraa Waaxda Socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst). Mar walba uma baahnid mvv fiiri ind.nl.

**Iska fiiri: ma suuroobeyso inaad marka hore inaad Nederland imaado oo aad ka dib mvv iyo sharci deganaansho weydiisato.**
Laakiin mar mar ayaad u baahnayn mvv Tusaale ahaan haddii aad jinsiyadad qaarkood heysato ama aad ugu yaraan 5 sano si sharci ah waddan kale oo EU-waddan ah ugu nooleyd. Markaasi mvv la'aan ayaad Nederland imaan kartaa iyo halkan ayaad deganaasho ka weydiisaneysaa.

## Ha kuu sameeyo qofka shaqada ku siinaaya fasaxa shaqada ama GVVA kuu dalbo

Waxaad badiyaa heysataa fasaxa shaqada ama Oggolaansho wada socda oo degannasho iyo shaqo ah GVVA (Gecombineerde Vergunning voor Verblijf en Arbeid) ayaad u baahan tahay haddii aad Nederland ka shaqeyneyso.

- Ma joogeysaa wax ka yar 90 beri? Ka shaqeynta Nederland Qofka ku shaqo siinaaya waa inuu fasaxa shaqada kaaga dalbaa UWV. Fiiri werk.nl/werkvergunning.
- Ma joogeysaa wax ka badan 90 beri? Ka shaqeynta Nederland Markaa waa in qofka shaqada ku siinaaya badiyaa uu kuu dalbaa GVVA. Wuxuu qofka shaqada ku siinaaya ka sameynaay-aa Waaxda Socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst). Fiiri ind.nl.
- Ma waxaad sameyneysaa shirkad ama ganacsade ahaan? Markaa uma baahnid fasaxa shaqada. Laakiin deganaansho sharci ah oo shaqaalaha iskooda u shaqeysta. Waa inaad fasax heysataa inaad shirkad sameysan karto. Taasi waxaa loo maraa Waaxda Socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst). Fiiri ind.nl iyo Markaad u shaqeyneyso ganacsade ahaan.



# Maxaa la doonayaa inaad sameyso markaad imaado Nederland

## Xadido mudada aad Nederland joogeyso

*Ma joogeysaa wax ka badan 4 bilood?*
Markaa waa inaad is qortaa sida is qoritaanka qof degan (toos u degan) Nederland. Taasoo aad ka sameyn karto dowladda hoose ee aad degan tahay.

*Ma joogeysaa wax ka yar 4 bilood?*
Markaa waa inaad is qortaa sida is qoritaanka qof muddo degan (toos u deganayn) Nederland.

**iska fiiri: ma ka soo daahday waqtiga aad is qori lahayd?** Markaa waa inaad ganaax bixisaa. Taasoo gaari karta ilaa € 325. waxaad wacdaa warbixin ahaan Rijksoverheid: **1400** ama **+31-77-4656767**.

## Is qoritaanka qof degan ilaa muddo (aan toos u deganayn) Nederland

Taasi waxaa laga sameyn karaa 19 xafiisyada, ee dowladaha hoose: Alkmaar, Almelo, Amsterdam, Breda, Den Haag, Doetinchem, Eindhoven, Groningen, Goes, Heerlen, Leeuwarden, Leiden, Nijmegen, Rotterdam, Terneuzen, Utrecht, Venlo, Westland iyo Zwolle. Waxaadtaasi u baahantahay keliya aqoonsi aan dhacsanayn.

**Iska fiiri: Ma joogeysaa wax ka badan 4 bilood?** Markaa isla markii u gudbi. Taasi waxaad ka sameyneysaa maagaalda aad degan tahay. Markaa waxaad noqoneysaa degane (toos u degan) Nederland.

## Is qoritaanka qof degan (toos u degan) Nederland

Taasi waxaad ka sameyneysaa magaalada aad degan tahay. Taasi waa inaad ku sameysaa 5 beri ka dib markaad imaaday Nederland. Is qoritaanka waa lacag la'aan. Dhamaan dadka reerkaaga ee kula degan ayaad la aadeysaa.

*Maxaad u qaadaneysaa dowladda hoose?*
- Dhamaan dadka reerkaga: Baasboor aan dhacsanayn ama kaarka aqoonsiga.
- Heshiiska ijaarka ama heshiiska gadashada guri Nederland ah.
- Dokumentiyada muhiimka ee waddankaaga. Tusaale ahaan: warqada dhalashada ama warqada nikaaxa.

*Qof miyaa guri la degan tahay?*
Qofkaasi waa inuu qoraal ahaan u cadeeyaa inaad gurigaasi degan tahay. Soo qaado koobiga ee aqoonsi (giisa/geeda).

## Waxaad yeelaneysaa BSN-nambar ah

Ka dib markii laguu qoro deganaha ama qof muddo degan Waxaad yeelaneysaa BSN-nambar ah (Burgerservicenummer). Taasi waad u baahan tahay. Tusaale ahaan:
- shaqo.
- xisaabta bankiga.
- dhaqtarka qoyska ama cisbitaalka.
- iskuulka caruurta.

## Waxaad sameysaneysaa cinwaan deganaan

Waxaad u baahan tahay cinwaan deganaansho. Keliya markaas ayaad is qori kartaa dowladda hoose. Wixii dheeraad ka aqri Deganaanshaha Nederland.

*Ma guureysaa?*
- Ma dowlad hoose kale ayaad u guureysaa? Markaa waa inaad cinwaankaaga cusub aad dowladda hoose aad siisaa dowladda hoose ee cusub. Taasi waxaad ka sameyn kartaa websaaytka dowladda hoose. Looma baahna inaad dib isu soo qorto.
- Ma waxaad u guureysaa isla dowladda hoose aad degan tahay dhexdeeda? Markaa waa inaad u sheegtaa dowladd hoose.
- Ma waxaad u noqoneysaa waddankaaga aad ka timid?
  - Is qoritaanka qof degan (toos u degan) Nederland: taasi u gudbi dowladda hosoe ee aad degan tahay.
  - Is qoritaanka qof degan ilaa muddo (aan toos u deganayn) Nederland: looma baahna inaad wax gudbiso.

Waad heysaneysaa BSN-nambarka. Haddii aad dib u imaaneyso, uma baahnid inaad BSN-nambar weydiisato. Ma waxaad haddan noqoneysaa degane Nederland? Markaa waa inaad dib isu qortaa dowladda hoose ee aad degan tahay.

## Waxaad sameysaneysaa ceymiska caafimaadka

Ceymiska caafimaadka waa mid waajib ah Nederland. Xitaa haddii aad Ceymiska caafimaadka waddankaaga ku leedahay.
Ceymiska waxey bixinayaan dhamaan qarashka dhaqtarka qoyska. Iyo qeyb qarashka daawwooyinka ee cisbitaalka. Wixii dheeraad ka aqri Ceymiska caafimaadka.

**Iska fiiri: hadii aadan sameysanin Ceymiska caafimaadka ?** Waa lagu ganaaxayaa. Iyo waa inaad dhamaan qarashka Daryeelka caafimaadka iskaaga u bixisaa. Wixii warbixin dheeraad kala xariir Zorgverzekeringslijn: **0800-6464644** ama **+31-88-9006960**. Ama ka fiiri zorgverzekeringslijn.nl/coming-from-abroad.

## Waa inaad sameysaa la qabsashada (inburgeren)

La qabsashada ama inburgeren waa waajib markaad waddan EU banaankeeda ka timid. La qabsashada waxaad baraneysaa Nederland. Waxaad baraneysaa ku hadalka luqada Nederlaanka ku hadalkiisa, qoritaankiisa, dhegeysashada iyo aqriska. Iyo waxaad baraneysaa sida aad shaqo ku heleyso.
Waxaa warqad kuu soo diraaya Waaxda Fulinta Waxbarashada (Dienst Uitvoering Onderwijs, DUO) marka aad sameyneyso la qabsashada (inburgeren). Fiiri Inburgeren.nl. Ama wac DUO: 050-5999600.

*Waa inaad la qabsashada ku sameysaa 3 sano gudaheeda.*
Waa inaad soo qaadataa shahaadada (inburgeringsdiploma). Taasi waa in 3 sano gudaheeda ka dib markaad sharcigaag deganaanshaha hesho.
Wax aqriska iyo qorista ma taqaanid miyaa? Markaa waxaa lagu siiinayaa 5 sano waqti ah oo aad shahaadada ku soo qaado.

**Iska fiiri: hadii aadan sameyn karin la qabsashada iyo aad saba fiican haysato?** Ama waad ku hadashaa iyo qortaa Nederlaanka? Markaasi nidaamyo kale ayaa jira. Fiiri inburgeren.nl.

*Iskaaga u baro ama iskuul aad*
Adiga ayaa iskaaga u baran kara si aad shahaadada la qabsashada u soo qaadato. Waxaad kaloo tababar ka dhigan kartaa iskuulka.

*Qarashka tababarka la qabsashada*
La qabsashada waa lacag. waxaad deyn ka weydiisan kartaa Waaxda Fulinta Waxbarashada DUO (Dienst Uitvoering Onderwijs). Laakiin waa keliya markaad tababarka ka dhigato iskoolka luqada ee haysta aqoonsiga. Waxaad blikopwerk.nl/inburgeren ka heleysaa iskuulaga haysta aqoonsiga. Keliya iskuuladan ayaa deyn u qaadan kartaa.
Magangeyodoonka (sharciga heysta) ee shahaadada inburgering soo qaada, loogama rabo iney deynta gudaan.

## Waa inaad luqada Nederlaanka barataa

Waa muhiim inaad Nederlaanka aad barato. Markaasi waxaad fursado badan u heleysaa shaqo oo darajadaada ah. Waxaad la hadli kartaa dowladda hoose ama dhaqtarka qoyska. Iyo iskuulka caruurta.

*Tababarada online-ka*
Adiga ayaa ka shaqeyn kara luqada Nederlaanka. Taas ka sameyn kartaa:
- Oefenen.nl luqada Nederlaanka barashadeeda. Tani waa lacag la'aan.
- Naarnederland.nl. Waxaa laga helaa wax ka badan ilaa 30 luqadood. Tani waa lacag la'aan.
- NT2taalmenu.nl. Tani waa lacag la'aan.

*Fasal ahaan*
Waxaad la baraneysaa dad kale oo iyagana cusub luqada Nederlaanka. Waxaad deyn ka weydiisan kartaa Waaxda Fulinta Waxbarashada (Dienst Uitvoering Onderwijs, DUO). Laakiin waa keliya markaad tababarka ka dhigato iskoolka luqada ee haysta aqoonsiga. Sidoo kale dowladda hoose wey bixiyaan tababar luqada. Weydii dowladda hoose ama iney dowladda hoose taada ay bixiyaan. Adigana waad raadsan kartaa tababar ka fiiri taalzoeker.nl.

*La barasho qof iqtiyaari ama folanteer ah*
Si aad Nederlaank si fiican u barataa waa inaad in badan ku hadashaa. Qof iskiisa u caawinaaya oo luqada kaa caawiya (taalmaatje) ayaa tani kaa caawini kara. Taasi waxaad ka heleysaa hetbegintmettaal.nl/integratie/nederlands-leren iyo taalzoeker.nl.

*Qofka aad u shaqeyso*
Waxaa qofka aad u shaqeyso muhiim u ah inaad Nederlaan fiican ku hadleyso. Markaasi nidaamka si fiican ayaad u fahmeysaa amaankana sidaasuu ku jiraa. Markaasina tababaro kale ayaad si fudud ub sameyn kartaa oo shaqada quseeya. Sidaa awgeed weydii qofka aad u shaqeyso inaad tababar luqada qaadan karto. Qofka aad u shaqeyso maalgelin ayuu helaayaa.

## Caawinaaad iyo talo oo luqadaada ah?

- La xariir safaaradaada Nederland ku taala. Waxaad rijksoverheid.nl/onderwerpen/ambassades-consulaten-en-overige-vertegenwoordigingen/inhoud ku qoran dhamaan wadamada Nederland safaarado ku leh.

**Ma waxaad u baahan tahay sharci deganaansho?**

**Maya: haddii aad tahay qof heysta dhalashada**

- waddan EU Yurubta Midowday (Europese Unie).
- Liechtenstein.
- Noorwey.
- IJsland.
- Swiiska.
- Kroweshiya.

**HaaLhaddii aad heysato jinsiyad wadan kale ah.**
Oo aad damacsan tahay inaad 90 beri ka badan aad Nederland joogto. Waxaad sharci deganaansho ka weydiisaneysaa Waaxda Socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst). Fiiri ind.nl.




# Ka shaqeynta Nederland

## Maxaad u baahan tahay markaad Nederland ka shaqeyneyso?

*Nambarka shaqsiga (Burgerservicenummer)*
Haddii aad rabto ka shaqeynta Nederlandwaxaad u baahan tahay BSN-nummer Nambarka shaqsiga (BSN-nummer). Taasi waxaa lagu siinayaa. Wixii dheeraad ka aqri BSN-nummer.

*Aqoonsiga waajibka*
Nederland waa inad mar walba is cadeyn kartaa. Sidoo kale shaqada markaad joogto. Qofka aad u shaqeyso ayaa koobi ka sameynaaya aqoonsigaaga. Laakiin qofka aad u sahqeyso ma ceshan karo aqoonsigaaga.

*Xisaabta bankiga Nederland*
Qofka aad u shaqeyso waa inuu mushaharka kuugu shubaa bankigaaga. Qeyb ka mid mushaharkaaga kaash ahaan ama wax ku bedel ah waa la oggol yahay. Taasi waxaa la oggol yahay keliya qeyb Mushaharka ugu yar ka koreeya mida da' daada loogu talo galay.
Xisaabta bankiga oo waddankaaga aad ka timidna waa suura gal. Markaasi xoogaa ayey qaadaneysaa ilaa aad mushaharkaaga heleyso.

*Sharciga oggolaanshaha shaqada (TWV)*
Maka shaqeyneysaa wax ka yar 90 beri Nederland? Markaa waxaad u baahan tahay fasaxa shaqada TWV (tewerkstellingsvergunning). Taasi waxaad ka weydiisaneysaa Waaxda shaqada UWV. Fiiri werk.nl/werkvergunning.

Ma u timid gaar ahaan Nederland inaad shaqeyso? Shaqo ma heshay? Isla markii ma shaqo geleysaa? Iyo ma joogeysaa wax ka badan 90 beri? Markaa waa in qofka shaqada ku siinaaya badiyaa uu kuu dalbaa sharci isku jira deganaansho iyo shaqo GVVA (Gecombineerde Vergunning voor Verblijf en Arbeid). Wuxuu qofka shaqada ku siinaaya ka sameynaayaa Waaxda Socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst). Fiiri ind.nl Markaa looma baahna inaad weydiisato (mvv).

## Shahaadooyinka waddanka kale

Waxbarasho waddan kale miyaa ku soo dhigatay? Shahaadana ka soo qaadatay? Ama waxaad leedahay shaqo waxbarasho ama tababar gaar ah loo dhigto? Shahaadadaada ama cadeynteeda Nederland toos loogama aqoonsana. Waxaad taasi weydiin kartaa Nuffic ku yaala Den Haag iyo SBB Zoetermeer.

- Kala hadal Nuffic: 070-4260260. Ama fiiri epnuffic.nl/en/diploma-recognition.
- Kala xariir SBB Ururka Wadashaqeynta Shaqooyinka Shirkadaha (Stichting Samenwerking Beroepsonderwijs Bedrijfsleven): 088-3380000. Fiiri s-bb.nl/en.

## Sharuudaha shaqaalaha

Marna ha shaqo gelin adigoo aan ogeyn waxa Sharuudaha shaqaalaha ay yihiin ee adiga ku quseeya.

*Asaaska Sharuudaha shaqaalaha*
Nederland dhamaan dadka shaqeeya waxey leeyihiin asaas Sharuudaha shaqaalaha oo isku mid ah. Taasi waxey ku qoran yihiin sharciyada Nederland. Asaaska Sharuudaha shaqaalaha waxaa tusaale ahaan:

- Sharciyan Mushaharka ugu yar.
- Maalmaha fasaxa.
- Lacagta fasaxa.
- 70% mushaharka oo qofka la siinaayo marka uu jiran yahay.
- Uurka markay leedahay fasaxa la oggol yahay.

*Sharuudaha shaqaalaha oo dheeraad ah*
Badiyaa qofka aad u shaqeyneyso wuxuu leeyahay cao heshiiska shaqaalaha oo wadajirka (collectieve arbeidsovereenkomst). Markaa meeshaasi ballamo dheeraad ayaa ku qoran. Iyo mar mar waxey kuwa loo shaqeeyo leeyihiin Sharuudaha shaqaalaha oo iyaga u gaar ah.
Sharuudaha shaqaalaha oo dheeraad ah waxaa tusaale ahaan ka mid ah:

- Mushahar ka badan mushaharka ugu yar.
- Sannadka dhamaadkiisa oo qarash dheeraad lagu siiyo.
- Maalmaha fasaxa oo dheeraad oonka badan Sharciyan inta ugu yar.
- Wax ka badan 70% mushaharka oo qofka la siinaayo marka uu jiran yahay.
- Baabuur ijaar ah.

Wixii dheeraad cao ku saabsan : Cao.

## Heshiiska shaqaalaha

Sameyso ballamo waadix ah oo ku saabsan Sharuudaha shaqaalaha ee adiga ku quseeya. Taasi badiyaa waxey ku qoran tahay Heshiiska shaqaalaha. Laakiin Nederland af ahaan xitaa waa looga heshiin karaa Sharuudaha shaqaalaha.
Laakiin maxaa la sameynayaa haddii uu qofka shaqada ku siinaaya ballanta ka soo bixin? Markaa wax cadeyn haba yaraatee ma haasatid. Markaa ku dadaal inaad mar walba cadeyn qoraal ah oo ballamada ah inaad heysato. Taasi e-mail ahaanna wey noqon kartaa.

## Warqada mushaharka

Ma shirkad Nederland ayaad u shaqeysaa? Markaasi waxaa lagu siinayaa Warqada mushaharka. Markaasi waxaa ku qoran tusaale ahaan:

- Mushaharkaaga oo buuxa.
- Canshuuraha iyo qeybaha kale uu qofka aad u shaqeyso ka reebaayo. Tusaale ahaan: canshuurta mushaharka.
- Mushaharkaaga kuu haraaya. Taasi waa Mushaharkaaga oo buuxa laga jaray Canshuuraha iyo qeybaha kale ee la bixiyo.
- Meeqa saac ayaa shaqeysey. Tusaale ahaan: 32 saac wiigii.
- Mudada mushaharka lagugu siinaayo. Tusaale ahaan: bisha julay.

## Cao

Badanka dadka loo shaqeeyo waxey leeyihiin heshiis shaqo wadajir ah cao (collectieve arbeidsovereenkomst). Waxaa cao ku qoran ballamo sharuudaha shaqada. Waa ballamo ka dhexeeya shaqo bixiyaha iyo shaqaalaha. Qofka aad u shaqeysaa waa inuu ku dhaqmaa.
Cao wuu ka duwanaan karaa ballanada shaciyanka ah. Laakiin keliya ahddii ay taasi dan ugu jirto shaqaalaha. Lama oggola inaad ka yar inta Sharciyan Mushaharka ugu yar siiyo. Laakiin ka badan waa la oggol yahay.
Ma dooneysaa inaad ogaato inuu qofka aad u shaqeyso leeyahay cao? Markaa weydii qofka aad u shaqeyso ama ururada shaqaalaha. Taasi waxaad ka fiirisaa Maxey sameeyaan ururada shaqaalaha?.

## Mushaharka ugu yar

Nederland waxey leedahay Sharciyan Mushaharka ugu yar iyo Lacagta fasaxa. Qofka aad u shaqeyso wax siyaado wuu ku siin karaa. Laakiin ka yar kuma siin karo. Warbixin dheeraad ka fiiri rijksoverheid.nl/onderwerpen/minimumloon iyo inspectieszw.nl.

**Iska fiiri: ma leeyahay qofkaad u shaqeyso cao?**
Markaa waa inaad mar walba mushahar qaadataa sida ku qoran waxa cao lagu ballamay. Ma lahan qofka aad u shaqeyso cao? Markaa waa inaad qaadataa Mushaharka ugu yar ee da' daada inaad qaadato.
Ma waxaa lagu siiyaa cao-ga mushahar ka yar? Markaa la xariir ururada shaqada. Ma waxaa lagu siiyaa Mushaharka ugu yar? Wac Waaxda baarista (Inspectie SWZ): **0800-5151** ama **+31-70-3335678**. Ama ka fiiri inspectieszw.nl.

## Saacadaha shaqada

Waxaa Nederland jira saacadaha shaqada oo shrciyan ah. Kuwaasoo dadka dhan leeyihiin. Adiga oo waddan kale ka yimidna sidoo kale. Nidaamkaasi waxey ku qoran yihiin Sharciga saaca-daha shaqada.

*Saacadaha shaqada sida ku qoran cao*
Shaqo bixiye walba waa inuu dhowraa Sharciga saacadaha shaqada. Waxaa cao qofka aad u shaqeyso ku qornaan kara ballano kale. Iyo qofka aad u shaqeyso. ballamo kale ayaa la sameyn kartaa. Tusaale ahaan: in cao ku qoran 36 saac wiigii inaad shaqeyso. Laakiin qofka aad u shaqeyso wuxuu kula ballami karaa 32 saac inaa shaqeyso. Taa waa la oggol yahay.

*Shaqada siyaadada*
Ma ka badan ayaad shaqeysaa inta ku qoran heshiiska? Taasi waa Shaqada siyaadada. Badiyaa waxaad heleysaa mushahar Shaqada siyaadada.

*Shaqada maalinta.*
Ma shaqeyn kartid wax ka badan 48 saac wiigii. Waxaa mar mar dhif ah la oggol yahay ugu badnaan 60 saac wiigii shaqeyso. Oo maalintii ugu badnaan maalintii 12 saac inaad shaqeyso. Inta u dhaxeyso waxaad xaq u leedahay nasasho.

*Shaqada habeenka*
Ma habeenkii ayaad shaqeysaa? Ma shaqeyn kartid wax ka badan 40 saac wiigii. Ka fiiri warbixinta: inspectieszw.nl.

## Meesha shaqada oo ah mid amaan ah

Waxaad xaq u leedahay meel amaan iyo cafimaad kuu leh inaad ka shaqeyso. Mar mar waa inaad wax amaanka ku jira aad xirataa. Tusaale: koofiyad ama muraayadaha amaanka. Qofka aad u shaqeyso waa inuu waxyaalaha amaanka loo xirto uu ku siiyaa. Waana iney lacag la' aan ahaadaa.
Ma ka shaqeyneysaa dhismaha ama beeraha? Ama waxaad ka shaqeyneysaa maadooyinka qatarta? Tusaale ahaan: asbest-ka ama kiimikada? Markaa waxaa jiro nidaamo gaar ah oo amaan-kaaga iyo caafimaadkaaga ku saabsan. Ka fiiri inspectieszw.nl ama arboportaal.nl. Waxaad kaloo la xariiri kartaa ururada shaqaalaha ama ururada shaqada qeybtaada ee qofka aad u shaqeyso.

## Qofka shaqada ku siinaaya ma yahay qof la aamini karo?

*Ma waxaa u shaqeyneysaa xafiisyada shaqada (uitzendbureau)?*
Markaa fiiri inuu xafiiskaasi shaqo:
- ma ku qoran yahay Rugta Ganacsiga (Kamer van Koophandel, KvK). Taas waxaad ka sameyn kartaa: kvk.nl. ama la xariir 0900-1234567 (€ 0,70 daqiiqadii).
- ka heysata cadeyn/shahaado Ururka Qiimeynta Shaqada (Stichting Normering Arbeid, SNA). Taas waxaad ka sameyn kartaa: normeringarbeid.nl/en.
- ganaaxyo lagu siiyey. Sidaa awgeed fiiri sncu.nl
- xubin ka ah ururka shaqooyinkaasi. Waxey fiiriyaan iney xubnahooda ka dhaqmaan cao. Waxey kaloo u raadiyaan xubnahooda sharuudo tayo leh :
  - Waxa wacdaa Guddiga Guud ee xafiisyada shaqada (Algemene Bond Uitzendondernemingen, ABU): 020-6558255. Ama fiiri abu.nl.
  - Wac NNBU: 033-47660200. Ama fiiri nbbu.nl.

*Ma shirkad Nederland ayaa u shaqeysaa?*
Ka fiiri qofka shaqada ku siiyey:
- ma ku qoran yahay Rugta Ganacsiga (Kamer van Koophandel, KvK). Taas waxaad ka sameyn kartaa: kvk.nl. ama la xariir 0900-1234567. (€ 0,70 daqiiqadii).
- iyo inuu leeyahay cao. Qofka/shirkada aad u shaqeyso waa inuu ka soo baxaa ballamada cao. Waxaad la xariir kartaa ururada shaqaalaha (Maxey sameeyaan ururada shaqada?) ama Dowladda (Rijksoverheid): 1400 ama +31-77-4656767.

*Ma shirkad ajnabi ayaa u shaqeyneysaa?*
Xitaa shirkadaha ajnabiga waa inuu dhowraa ballamada sharciyanka ee muhiimka ah ee Nederland. Sida: ballamada mushaharka ugu yar, saacadaha shaqada ama xaaladaha shaqada. Markaa hadii uu jiro cao, waxaa taasi ay quseysaa shirkada ajaanibka shaqada ku siineysaa. Weydii (Juridisch Loket) iney caawinaad iyo talo ku siiyaan. Waxaa wacdaa 0900-8020.

**Iska jir: qofka/shirkadaasi ajaanibka waa inuu bixiyaa canshuurta mushaharka uu kaa bixiyo ee Xafiiska canshuuraha (Belastingdienst) uu siiyaa.** Haddii uu qofka/shirkada uu sameyn waayo? Markaa xaq uma lihid WW ceyrta shaqo la'aantaa (werkloosheiduitkering) hadii shaqo la' aan kugu dhacdo. Ama Ceyrta jiradaa marka aad jirato. Taasi waxaad ka soo fiirin kartaa Canshuuraha (Belastingdienst). Wac telefoonkooda dibada (Belastingtelefoon Buitenland): **055-5385385**. Waxaad heysataa BSN-nummer (Nambarka shaqsiga).

## Bixinta canshuurta

Shaqaale ahaan ama haddii aad ceyr qaadato,waa inaad canshuuraha bixisaa haddii:
- Canshuuraha (Belastingdienst) ey ku weydiiyaan.
- shaqada lacag aad ku qaadatay iyadoo canshuuraha aysan ogayn.
- aad xoolo leedahay.

Ganacsade miyaa tahay? Waa inaad mar walba canshuurbixisaa Taasi ka hor ama ka dib ayaa la sameyn karaa. Wixii dheeraad: Markaad u shaqeyneyso ganacsade ahaan. Ganacsade ahaan waa inaad sanad walba waajib kugu ah inaad u gudbiso wargelinta Canshuuraha (Belastingdienst). Waxaad u sheegeysaa inta daqli ku soo galay. Wargelinta canshuurta mar walba waa ka hor 1 may. Waxaa warbixin dheeraad ka heleysaa telefoonka canshuuraha (Belastingtelefoon): 0800-0543. Ama fiiri belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch.

## Shaqadaada ma kaa dhamaatay/weydey?

Waxaad laga yaabaa markaa inaad xaq u leedahay WW ceyrta shaqo la'ida (werkloosheidsuitkering). Taasi nidaam ayaa u degsan:
- Lama rabo inuu qaladkaaga ahaado inaad shaqada weydey.
- Waa inaad ugu yaraan 36 dii wiig ugu dambeeyey 26 wiig aad shaqeyneysey.
- Waxaa waajib kugu ah inaad shaqo kale raadsato.

Waxaad wacdaa UWV (ururka ceyrta): 0900 -9294 (€ 0,04 daqiiqadii, taasoo ka bilaabaneysa € 0,045). Fiiri uwv.nl/particulieren/internationaal/werken-in-nederland.

## Ma jiratay ama shaqo gab ma tahay?

*Mushaharka oo kuu soconaaya*
Markaa waa in uu qofka/shirkada aad u shaqeysaa mushaharka ku sii wadaa. Badiyaa waa 70% oo mushaharkaaga. Badiyaa beryaha hore wax mushahar laguma siinaayo.

*WIA*
Ma wax ka badan 2 sano ayaa jiran tahay? Markaa waxaa geleysaa WIA (arbeidsongeschiktheidsuitkering). UWV (xafiiska lacagta bixiya) ayaa fiirinaaya wixi shaqo aad weli qaban karto. Iyo haddii aad xaq u leedahay ceyrta.

*Sharciga jirada*
Ma waxaad u shaqeysaa xafiisyada shaqada? Iyo ma lihid heshiis joogto oo shaqo? Markaa waxaa lagu siinayaa ceyrta nooca (Ziektewet).
Wixii warbixin dheeraad ku saabsan Ziektewet iyo WIA ceyrta shaqo gabka (arbeidsongeschiktheidsuitkering) ka fiiri uwv.nl.

*Jirada iyo shaqo ka saarida*
Qofka/shirkada shaqada ku siiyey kuma burin karaan. Keliya:
- haddii aad weli waqtigii tijaabada ku jirto.
- haddii aad 2 sano jiran tahay.
- haddii aad isla markaa shaqada lagaa buriyo.

**Iska jir: ceyrta wuxuu sababi karaa inaad Nederland ka baxdaa iney noqoto.** Weydoo Waaxda Socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst, IND) iney taasi adigana xaaladaada tahay. Waxaad taasi u aadi kartaa hal ka mid ah sideeda xafiis ee IND. Waxey ku yaalaan Amsterdam, Den Bosch, Eindhoven, Hoofddorp, Rotterdam, Rijswijk, Utrecht, Zwolle. Ballan waxaad ka sameysataa: **088-0430430**. Ama fiiri ind.nl/organisatie/contact/adressen.

## Maxey sameeyaan ururada shaqaalaha?

Ururka shaqaalaha ayaa ka shaqeeya in shaqaalaha ay helaan waxa ay xaq u leeyihiin, Tusaale ahaan: iyagoo shirkadaada kala ballamaaya cao. Waxey kaloo ururka shaqada kaa caawinaayaan:

- su' aalaha ku saansan cao-gaaga.
- markaad buuxbuuxineyso wargelinta Bixinta canshuurta.
- caawinaada sharciyada marka ay dhibaato jirto.

Waxaa suura gal ah inaad marka hore xubin ka noqotaa si laguu caawiyo.

Ma dooneysaa inaad arrintan wax dheeraad ka ogaataa? Maxey sameeyaan ururada shaqaalaha? Waxaad Tusaale ahaan weydiisaa:

- Iskaashatada shaqaalaha Nederland (Federatie Nederlandse Vakbeweging, FNV). Wac 088-3680368. Ama fiiri fnv.nl/contact.
- Ururkaa kirishtanka ee shaqaalaha (Christelijk Nationaal Vakverbond, CNV). Wac 030-7511001. Ama fiiri cnv.nl.

**Caawinaad dhibatooyinka shaqada kaa qaban kara.**

- Ma waxaa lagu siiyaa Mushaharka ugu yar wax ka yar? Wac markaa Inspectie SZW: **0800-5151**.
- Ma waxaa lagu siiyaa Mushahar ka yar cao-ga? Markaa la xariir ururada shaqada.
- Ma waxaa u shaqeysaa shirkad shaqada kuu dirta Ma waxaa lagu siiyaa Mushahar ka yar cao-ga? Wac Ururka Fulinta CAO dadka shaqada loo diro (Stichting Naleving CAO voor Uitzendkrachten, SNCU): **0800-7008**. Waxaad kaloo dabcab la xariiri kartaa urur shaqaale (Maxey sameeyaan ururada shaqaalaha?).
- Badiyaa marar badan maad siyaado shaqeysaa wax ka badan inta cao ama heshiiskaaga shaqaale ku qoran? Markaa waxaad wacdaa (Inspectie SZW): **0800-5151** ama fiiri inspectieszw.nl.
- Ma ka shaqeysaa shaqo aan amaan lahayn? Wac markaa Inspectie SZW: **0800-5151**.
- Qofka/shirkada ku shaqo geeyey ma kaa faa' iideystaa oo shaqo badan kugu qabtaa? Tusaale ahaan: xaaladaha culus ama qatarta ee shaqaalaha xaaladooda, lagu canaadaayo, lacag yar lagu siinaayo ama lagu qiyaanaayo? Ama qofka/shirkada aad u shaqeyso baasaboorka ma kaa qaaday? Taasi waxey noqon kartaa miirasho. Miirashada waxaad u sheegi kartaa waaxda baarta Inspectie SZW: **0800-5151** ama inspectieszw.nl ama si qarsoodi ah u soo gudbi Gudbi Dembiga adoon is sheegin (Meld Misdaad Anoniem): **0800-7000**. Wixii caawino waxaad wici kartaa Ururka FairWork (Stichting FairWork): **020-7600809**.

## Markaad u shaqeyneyso ganacsade ahaan

Waxaad noqon kartaa ganacsade madax banaan. Taasi nidaam ayey leedahay. Ma waxaad u baahan tahay sharci deganaansho? shaqada madax banaan. Taasi waxaa loo maraa Waaxda Socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst, IND). Fiiri ind.nl wixii warbixin dheeraad.
Waana inaad ganacsade ahaan iska qortaa Rugta Ganacsiga (Kamer van Koophandel, KvK). Tani waa inaad sameysaa ka hor intaadan weydiisanin sharciga deganaanshaha.

*Ma ku qoran yahay KvK Rugta Ganacsiga (Kamer van Koophandel)*
Waa inaad iska qortaa Rugta Ganacsiga (Kamer van Koophandel, KvK). Taasi waa inaad ballan u sameysataa. Tani waa inaad sameysaa inta u dhaxeysa wiig ka hor intaadan ganacsigaaga bilaabin iyo wiig ka dib markaasi.
Markaad is qoreysaa waxaa isla markii lagu siinayaa nambar BTW. Taasina uma baahnid inaad gooni ugu tagto Canshuuraha (Belastingdienst). Wixii warbixin dheeraad wac KvK: 088-5851585. Markaa waxaad kaloo ballan u sameysaneysaa wadahadal la talin ah. Sidoo kale fiiri kvk.nl/english/starting-a-business/. Halkaan waxaa ku qoran iyadoo Inglishka qaabka KvK isqoritaankeeda yahay. Waxaad kaloo ka heleysaa qoraal aad soo degsan karto (download).

*Ondernemersplein.nl iyo Startup.ondernemersplein.nl*
Halkan waxaad ka heleysaa dhamaan warbixinta dowladda Nederlaanka ee ganacsiga. Tusaale ahaan: sidee u shaqeeyaan Canshuuraha? Sharciyadee ayaad u baahan tahay? Ama: sidee ayaa u sameynysaa qorshaha ganacsiga?

*Canshuuraha ganacsadayaasha.*
Nidaamka canshuuraha ganacsadayaasha madax banaan wey ka duwan yihiin shaqaalaha ama dadka qaata ceyrta. Dhowr tusaalooyin:

- ganacsade madaxbanaan ahaan waa inaad bixisaa canshuurta iibka (omzetbelasting, BTW) markaad shaqaale tahay ma bixineysid.
- haddii aad shirkad u shaqeyso, waa in shirkada ay kaa bixisaa canshuur mushaharkaaga.
- haddii isla shirkadaasi aad ganacsade madaxbanaan kuu ijaartaan, markaa looma baahna.

Waa in dhamaan shaqadaada aad ogeysiisaa Canshuuraha (Belastingdienst) hadii shaqo. Ganacsi ka shaqeyso ama shaqaale ahaan. Waxaa muhiim ah inaad lacag gooni u dhigto aad ku bixiso Canshuuraha. Waayo hadaad bixinin, waa lagu ganaaxayaa. Waxaad kaloo sameyn kartaa inaad canshuurta hormariso. Markaasi hal mar ma wada bixineysid, laakiin bil walba qeyb. Markaa waa inaad weydiisataa bixiska horeeya,
Fiiri belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch
Waxad kaloo wici kartaa telefoonka canshuuraha (Belastingtelefoon): 0800-0543.

*Jirada ama shaqo la' aanta*
Ganacsade ahaan wax mushahar laguuma siinaayo markaad jiran tahay. Mana heleysid WW ceyrta shaqo la' aanta (werkloosheids-uitkering) hadii shaqo la' aan kugu dhacdo.

**Ma waxaad u baahan tahay sharci shaqo?**

✗ **Maya: haddii aad tahay qof heysta dhalashada**
- waddan EU ah Yurubta midowday (Europese Unie).
- Liechtenstein.
- Noorwey.
- IJsland.
- Swiiska.

✓ **Haa: haddii aad dhalashada Kroatiga heysato.**

✓ **Haa: haddii aad heysato jinsiyad wadan kale ah.**
Tusaale ahaan: waddan Afrika ama Aasiya ah. Qofka/shirkada aad u shaqeyso waa inuu sharci shaqo kaaga dalbaa UWV ama GVVA ee IND Waaxda socdaalka iyo deganaanshaha (Immigratie- en Naturalisatiedienst). Warbixin dheeraad fiiri werk.nl/werkvergunning iyo ind.nl. Ama wac UWV ka wac **088-8982070**.



# Deganaanshaha Nederland

**Maxaad sameyneysaa haddii aad halkaan soo degeysid?**

## Mar walba heyso cadeynta aqoonsigaaga

Waxaa cadeyn aqoonsi ah:
- baasaboor.
- baasboorka ajaanibta Nederlaanka.
- dokumentiga sharciga ee ajaanibta Nederlaanka (verblijfsvergunning).
- cadeynta aqoonsiga ajaanibta ilaa uu go' aanka codsigaaga magnagelyodoonka.

Waa inaad cadeynta aqoonsiga mar walba heysataa. Laakiin qof walba kuma weydiin karo.

*Goormaa aqoonsigaaga tuseysaa?*
- Jidka Keliya askariga ama shaqaalaha baaritaanka (Buitengewoon opsporingsambtenaar, BOA) uu ku weydiiyo
- gaadiidka dadweynaha dhexdiisa. Haddii shaqaalaha tareenka, baaraha ama shifeerka uu ku weydiiyo.
- Dukaamada, bankiyada ama dhismaha kale ee dadweynaha u furan. Haddii waardiyaha uu ku weydiiyo.
- Shaqadaada. Haddii uu qofka aad u shaqeyso, baaraha baaritaanka (Inspectie SZW) ama baaraha Canshuuraha Belastingdienst uu ku weydiiyo. Qofka aad u shaqeyso ayaa koobi mar walba ka sameynaaya aqoonsigaaga.

Haddii uu qof ku weydiiyo aqoonsigaaga, adigana waad weydiin kartaa aqoonsigiisa.
Marna aqoonsigaaga qof kale ha siinin.

## DigiD

Waxyaalo badan oo Nederland waxaad u baahan tahay DigiD. Waxaad DigiD ku geli kartaa websaytyada dowladda iyo daryeelka. Sidaa ayaad bixinta canshuurta ku sameyn kartaa. Weydiisashada kabida ijaarka. Ballan ka sameysashada cisbitaalka. Ama markaad weydiisaneyso in canshuurta degnmada lagaa dhaafo. Waxaad keliya DigiD weydiisan kartaa haddii aad degan tahay ama aad ku nooshahay waddanka Nederland.
DigiD-gaaga halkan ka weydiiso: digid.nl/aanvragen. Waxaad u baahan tahay Nambarka shaqsiga (BSN-nummer). Fiiri BSN-nummer.

## Guri inaad hesho

Dadka badankooda jooga Nederland ee u imaada iney ka shaqeeyaan. Waxey ijaartaan guri ama qol.

*Ka ijaaro Qofka aad u shaqeyso ama xafiiska shaqada kuu direy (uitzendbureau)*
Markaa si fiican u fiiri xarfaha yar yar. Tusaale ahaan: ijaarka ma mushaharkaaga ayaa laga goynaa? Markaa kala ballan cida bixineysa qarashka dheeraadka bixinaaya. Sida gaaska, korontada iyo biyaha.

*Ka ijaarashada shirkad guryaha*
Shirkada guryaha waa inaad iska qortaa. Websaaytka degnmadaada waxaa ku qoran shirkadaha ee degmadaada ah. Guri miyaa banaanaaday? Markaa fariin ayaa laguu soo diraayaa.
Ijaarka sannad walba waa la kordhinaayaa. Taasi waxaa loo sameeyey buundooyin sharciyan ah. Halkaa ayaad ka fiirin kartaa inuu ijaarkaaga sax yahay. Fiiri sidoo kale rijksoverheid.nl/onderwerpen/huurwoning. Ama wac Rijksoverheid: 1400 ama +31-77-4656767.

*Kabida ijaarka*
Mar mar waxaad xaq u leedahay Kabida ijaarka. Waxaad markaasi bil walba heleysaa lacag aad ijaarkaaga si fudud u bixisid kuu suura gelinaaya. Waxaad Kabida ijaarka ka weydiisaneysaa Canshuuraha (Belastingdienst). Wixii warbixin dheeraad ka fiiri Qarashka dheerida iyo wax laguu soo celinaayo.

*Markaad qof shicib ka ijaarato*
Shirkada guryaha markiiba guri isla markii ma haayaan. Sugitaanka ma kugu dheeraaday? Markaa waad ka ijaaran kartaa qof shicib ah. Markaa ijaarkaaga badiyaa waa qaalisan yahay. Mar mar waxaad xaq u leedahay Kabida ijaarka. Shicibka ijaarkooda waa mid 'isku jira'. Taasi badiyaa waa ijaarka oo la socda kharashka (gaaska iyo korontada). Dhamaan kharashka kale ee degaanka waa inaad iskaaga u bixisaa. Tusaale ahaan: ceymisyada iyo interneetka.

*La degitaanka shaqaalaha kale ee soo galootiga ah*
Ma waxaad degan tahay cambing-ka, guryaha fasaxa ama meelaha la seexdo oogaarka u ah shaqaalaha soo galootiga? Halkaasi nidaamyo gaar ah ayaa jira. Taasi degmo walba wey kala duwan yihiin. Weydii sidaa awgeed warbixin inaad taasi degmadaada.

*Sii cinwaankaaga degmada*
Isla markii aad guri hesho, cinwaankaaga sii degmadaada. Ma guureysaa? Meesha *Ma guureysaa?* Waxaad ka aqrineysaa waxa aad sameyneyso.

*Guri gadasho*

Guri adiga aad yeelaneyso waad gadan kartaa. Ma heysatid lacag kugu filan aad leedahay? Markaa waa inaad deyn ama hypotheek qaadataa. Nidaamkiisa wuu adag yahay kaasi. Fiiri sidoo kale rijksoverheid.nl/onderwerpen/koopwoning. Waxaad kaloo waci kartaa Rijksoverheid: 1400 ama +31-77-4656767. Ribada aad deybta guriga hypotheek ka bixisay waa laga goyn karaa canshuurta iibka.
Waa inaad canshuuro dheeraad bixisaa hadii aad guri gadato. Taasi waxaa la yirahdaa eigenwoningforfait. Wac wixii warbixin dheeraad telefoonka canshuuraha (Belastingtelefoon): 0800-0543. Ama fiiri belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch.

*Canshuuraha degaanka haddii aad guri iska leedahay*

Guri ijaar maa heysataa ama guri aad adiga leedahay? Waa inaad canshuur degaanka bixisaa:

- Canshuurta biyaha musqusha.
- Canshuurta qashinka.
- OZB (canshuurta ma guurtada).
- Canshuuraha biyaha.

Canshuuraha degmada: Taasi degmo walba wey kala duwan yihiin. Weydii degmadaada inta degmadaada la bixiyo

**Dhibaato xagga guriga**

Ijaarkaaga aad muu u sareeyaa? Fiir huurcommissie.nl. Waxaa ku qoran Warbixin dheeraad inta ijaarkaaga noqonaayo ee la oggol yahay iyo xaquuqdaada adiga oo ijaartaha ah. Waxaad kaloo waci kartaa Rijksoverheid: **1400** ama **+31-77-4656767**. Gurigaag amaan ma ahan miyaa? Dad badan miyaa hal qol degan tihiin ama hal guri? Ma dhibaato ayaa idinka dhaxeysa kan guirga kaa kireeyey? Waxaad Weydiisaa (Juridisch Loket) waxa aad sameyn karto. Ballan waxaad ka sameysataa: **0900-8020**. Ama fiiri juridischloket.nl/wonen/huurwoning.

*Qashinka*

Degmooooyin badan ayaa qashinka kala bixiya. taasi waxey micnaheeda tahay inaad qaab kala duwan ugu geysaa. Dhalada, warqada, qashin guriga, balaastiiga.
Haddii aad nidaamka dhowrin? Markaa waa lagu ganaaxayaa. Weydii degmadaada wax nidaamka uu yahay.

## Wadida baabuurka Nederland

*Laysanka aan dhicin*

Ma dooneysaa inaad baabuur ku wado markaad Nederland degan tahay? Waxaad markaa u baahan tahay laysan aan weli dhicin. Laysanka wadankaaga halkaan kama shqynaayo. Sidaa awgeed waa inaad dib u qaadataa laysankaaga. Waxaad taasi ka sameyn kartaa iskuulada baabuurta bara dadka. Mar rijschoolgegevens.nl ayaad iskuulada baabuur barashada ka raadin kartaa.
Wac warbixin dheeraad Adeega Dowladda ee arrimaha jid/gaadiidka (Rijksdienst voor het Wegverkeer, RDW): 0900-0739 (€ 0,10 daqiiqadii). Ama fiiri rdw.nl/englishinformation.

*Gadasho baabuur*

Baabuur ka gadasho Nederland? Waa inaad isla markii:

- Baabuurka ceymis gelisaa.
- Mrb canshuuraha gaadiidka (motorrijtuigenbelasting) bixisaa.

Waxaa heleysaa ganaax haddii baabuurkaaga uusan ceymiska ku jirin. Ama haddii aad mrb bixinin.
Waxaad rdw.nl/englishinformation ku qoran waxyaalaha aad ka taxadareyso markaad baabuur gadato.
Wac wixii warbixin dheeraad Belastingtelefoon Auto: 0800-0749. Ama fiiri belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch.

*Aqbalida/ baarida baabuurta APK keuring*

Baabuurta waa waajib iney amaanka iyo biiyadda wasaqeynteeda laga baaraa. Inta jeer aad sameyneyso waxey ku xiran tahay, da' da baabuurka,culeyskiisa baabuur iyo shidaalka la isticmaalo. Wac warbixin dheeraad Adeega Dowladda ee arrimaha jid/gaadiidka (Rijksdienst voor het Wegverkeer, RDW): 0900-0739 (€ 0,10 daqiiqadii). Ama fiiri rdw.nl/englishinformation.

*Ka dhaafitaanka mrb*

Mar mar looma bixineysid mrb (motorrijtuigenbelasting). Tusaale ahaan:haddii aad u shaqeyso shirkad ajnabiga. Fasaxida waa inaad weydiisataa. Taasi waxaad ka sameyneysaa Belastingdienst. Wac wixii warbixin dheeraad Belastingtelefoon: 0800-0749. Ama fiiri belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch.

## Gaadiidka dadweynaha ee Nederland

Taasi waxaad u baahan tahay OV chipkaart. Taasina waxaad ka gadan kartaa meelaha boosteejada, supermaarkeetka ama dukaamada sigaarka gada. Kaarkana halkaa waa ku buuxin kartaa. Fiiri ov-chipkaart.nl.

## Caruurta

Waa inaad caruurtaada ka qortaa degmada. Iyo iskuul ku qortaa.

*Iskuulada waa waajib 5-18 sano*
Laga bilaaboo 4 sano waa loo oggolyahay. Caruurta in Nederland qayb aadaan dugsiga hoose (basisschool). Laga bilaabo 5 sano waa waajib waxbarasho ayaa saaran. Taasi waxey soconeysaa ilaa 18 jir gaaraan. Caruurta 13 jir iyo wixii ka weyn waxey badiyaa aadaan dugsi sare. Tusaale ahaan: vmbo, havo ama vwo.
Dugsiga hoose adiga ayaa dooran kara. Taasina waxaa jira qoraal ku jira interneetka. Qoraalkani waxaa keliya la helayaa asagoo luqada Nederlaanka ku qoran. Fiiri kale rijksoverheid.nl/onderwerpen/basisonderwijs. Mar mar waxaad warbixin ka heleysaa dowladda hoose aad degan tahay doorashada dugsiga hoose. Waxaad iskuulada degmadaada barbar dhigi kartaa scholenopdekaart.nl. Iyo dabcan iskuulka waad soo fiirin kartaa. Markaasi waa inaad ballan iskuulka la soo sameysataa. Ama degmadaada. Waxaad kaloo waci kartaa Rijksoverheid: 1400 ama +31-77-4656767. Fiiri rijksoverheid.nl/onderwerpen/leerplicht iyo rijksoverheid.nl/onderwerpen/basisonderwijs.

*Xanaanada caruurta*
Caruur badan ayaa Nederland waxey aadaan xarun caruurta (kindercentrum) ama ciyaarsiinta caruurta (peuterspeelzaal). Taasi waa mid lacag ah.
Afar waxyaalood ayaa suura gal:
- Xarun caruurta, xanaano maalinta: Caruurta jira 0 ilaa 4 jir.
- Xarun caruurta, heynta waqtiga iskuulka ka dib: waa Caruurta jira 4 ila 12 jir.
- Waalidhaya: waa Caruurta jira 0 ilaa 12 jir.
- Ciyaarsiinta caruurta: waa Caruurta jira 2 ilaa 4 jir.

*Fiiro gaar oo casharo luqada ah*
Ciyaarsiinta caruurta iyo xarumaha caruurta waxey fiiro dheeraad u leeyihiin luqada Nederlaanka. Sidaa darteed ayaa Caruurtaada u yeelanaayaan bilow fiican markey dugsiga hoose aadaan. Weydii degmadaada warbixin dheeraad.

*Kabida qarashka caruurta la haayo (Kinderopvangtoeslag)*
Ma aadaa Caruurtaada xarun caruurta oo diiwaangashan ? Ama waalidka haaya oo diiwaan gashan? Markaa waxaad dalban kartaa Kabida qarashka caruurta la haayo (Kinderopvangtoeslag). Taasoo kuu fududeyneysa Xanaanada caruurta inaad bixiso. Iska jir: Kabida qarashka caruurta la haayo (kinderopvangtoeslag) waxa keliya ay suura geleysaa marka aan guriga qof joogin shaqo darteed.
Waxaad weydiisataa (Qarashka dheerida iyo waxa laguu soo celinaayo) Canshuuraha (Belastingdienst). Waxaa toeslagen.nl ku qoran sharuudaha Kabida qarashka caruurta la haayo (kinderopvangtoeslag). Wac wixii warbixin dheeraad Belastingtelefoon: 0800-0543. Xanaanada landelijkregisterkinderopvang.nl iyo rijksoverheid.nl/onderwerpen/kinderopvang.

*Xafiiska daryeelka Caruurta (Consultatiebureau) waa caruurta ilaa 4 jir*
Waxaa xafiiska daryeelka ka shaqeeya dhaqaatiir iyo kalkaalisayaal. Kuwaasoo wax walba aqoon u leh ku saabsan horumarka caruurta ilaa 4 jir. Xafiiska caruurta waa lacag la' aan.
Si toos ayaa casumaad uga heleysaa xafiiska caruurta markaad Caruurta ku qorto degmada. Ka dibna adiga ayaa ballan sameysanaaya.
Weydii degmadaada warbixin dheeraad. Waxaad kaloo aaadi kartaa GGD. Cinwaanka waxaad ka heleysaa adigoo waca 030-2523004. Ama waxaad cinwaanka GGD ka heleysaa ggd.nl/contact.

*Dhaqtarka iskuulka iyo kalakaalisada iskuulka waa caruurta ilaa 19 jir ah*
Iskuul walba waxey la shaqeeyaan dhaqtarada iskuulka iyo kalkaalisada iskuulka ee Xarunta dhalinta iyo Reerka (Centrum voor Jeugd en Gezin, CJG). Waxey sannad walba fiirinaaya in caruurta dhamaan ee iskuulka ay caafimaad qabaan iyo si fiican u korayaan. Tani waa lacag la'aan.
Caruurta waxey casumaad arrintaan ah helayaan iskoolka. Mar mar iskuulka ayaa jira saacado qaabilaad. Waxaa muhiim ah inaad raacdo caruurta.

*Mashruuca talaalka dowladda waa caruurta ilaa 19 jir*
Mashruuca talaalka dowladda waxey ka badbaadisaa caruurta jooga Nederland toban iyo labo xanuuno infakshan. Tusaale ahaan: hablobaas, jadeeco iyo xiiq dheer.
Tallaalka waajib ma aha. Laakiin waalidiinta badankooda wey sameeyaan (ka badan 95%).
Waxaa Caruurta kuu talaali kara dhaqtarkaaga qoyska. Ama xafiiska daryeelka. Markaa keliy ayey tallaalada lacag la' aan yihiin. Fiiri rijksvaccinatieprogramma.nl. Ama rivm.nl/en.

*Caawinaad barbaarinta*
Degmooyinka badankooda waxaa ka shaqeeya Xarunta dhalinta iyo Reerka (Centrum voor Jeugd en Gezin, CJG). Halkan ayaa kala xariiri kartaa dhamaan su' aalahaaga caafimaadka, koriimada iyo barbaarinta. Waxaad heleysaa talooyin, taageero iyo cawinaad kugu haboon. Waxaa CJG kuu sameynayaan dhaqtarka iskuulka iyo kalkaalisada iskuuka. Fiiri opvoeden.nl wixii warbixin dheeraad.

## Ceymiska caafimaadka

Ceymiska caafimaadka waa mid waajib ah Nederland. Taasi waxaad u tegeysaa Ceymis bixiyaha (zorgverzekeraar). Ceymiska caafimaadka qeybo dhowr ah oo kala duwan ayuu leeyahay:

- Ceymiska asaasiga. Kani waa waajib.
- Cemiska dheeraadka, Kani adiga ayaa iqtiyaar u leh.
- Ceymiska dhaqtarka ilkaha. Kani adiga ayaa iqtiyaar u leh.

**Iska fiiri: hadii aadan sameysanin Ceymiska caafimaadka ?** Waa lagu ganaaxayaa. Iyo waa inaad dhamaan qarashka daryeelka caafimaadka iskaaga u bixisaa. Wixii warbixin dheeraad kala xariir Zorgverzekeringslijn: **0800-6464644** ama **+31-88-9006960**. Ama ka fiiri: zorgverzekeringslijn.nl/coming-from-abroad

*Lacagta bisha Ceymiska caafimaadka*

Lacagta bishii la bixiyaa waa kala duwan yihiin ceymisyada. Taasi adiga ayaa iska bixinaaya. Mar mar waxaa lagu siinayaa kabida daryeelka. Markaasi si fudud ayaa bisha u bixin kartaa lacagta. Tani waxaad ka fiirisaa Qarashka dheerida iyo waxa laguu soo celinaayo. Caruurtaada ilaa 18 jir lacag laáan ayey caymiska kugula jiraan.

*Qeybta aad iska bixineyso.*

Dhamaan Ceymisyada caafimaadka waxey leeyihiin qeyb ugu yaraan waajib ah taasoo ah Qeybta aad iska bixineyso (eigen risico). 2016 waxey ahayd € 385. Waad dooran kartaa Qeybta aad iska bixineyso oo intaa ka badan. Markaa lacagta aad bisha bixineyso ayaa yaraanaaya. Ceymisyada badankooda Qeybta aad iska bixineyso qeyb qeyb ayaad u bixin kartaa.

Qeybta aad iska bixineyso waa Tusaale ahaan: marka :

- Daawooyinka aad qaadaneyso.
- Markaad cisbitaalka aado.
- Dhiig lagaa qaadaayo.

Qeybta aad iska bixineyso kuma jiro Tusaale ahaan: marka :

- Markaad dhaqtarka qoyska aadeyso
- Umulisada ama daryeelka umusha u baahan tahay.
- Marka xanuuno aad muddo dheer qabtey daryeel u baahan tahay.
- Daryeelka kalkaalisada xaafada u baahan tahay.
- Daryeelka Caruurta ilaa 18 jir.
- Jimicsiga (fysiotherapie) u baahan tahay. Ka dib markaad 22 jeer laguu sameeyo ka dib ayaa ka bixineysaa Qeybta aad iska bixineyso.

**Iska jir: hadaad bixin Qeybta aad iska bixineyso?** Markaa waxaa lagugu soo dalacaayaa qarash dheeraad: waa qarashka dheeraadka (incassokosten) Wixii warbixin dheeraad kala xariir Zorgverzekeringslijn: **0800-6464644** ama **+31-88-9006960**. Ama ka fiiri : zorgverzekeringslijn.nl/coming-from-abroad

*Ma shirkad ajnabi ayaa u shaqeyneysaa?*

Markaa waa heysan kartaa ceymiska wadankaaga. Taasi nidaam ayaa u degsan. Wixii warbixin dheeraad kala xariir SVB (Sociale Verzekeringsbank): 020-6565277. Ama fiiri svb.nl/int/nl/algemeen/wizards/w_nl_btl_wg.jsp. Waxaad halkaa ka heleysaa warbixin luqadaha Inglishka, Faransiiska, Jarmalka, Isbaanishka iyo Turkiga.

*Qofka aad u shaqeyso*

Mar mar Qofka aad u shaqeyso Waxaad ka sameysaneysaa ceymiska caafimaadka. Taasi oo la yiraahdo Ceymiska caafimaadka ee wada jirka.
Tani badiyaa wuu ka jaban yahay markaad iskaaga ceymis u sameysaneyso. Weydii qofka aad u shaqeyso warbixin dheeraad.

**Talo: fiiri** zorgverzekeringslijn.nl. waxaa laga helaa warbixin boolishka, Isbaanishka, Faransiiska, Inglishka iyo Jarmalka.

*Kabida caafimaadka.*

Daqligaaga ma yar yahay? Markaa waxaad heli kartaa Kabida caafimaadka. Markaasoo Ceymiska caafimaadka bixiskeeda ya kuu fududaaneyso. Tani waxaad ka fiirisaa Qarashka dheerida iyo waxa laguu soo celinaayo.

## Daryeelka caafimaadka

Daryeelka caafimaadka ee Nederland ma ahan lacag la'aan. Laakiin qarashka badankiisa waxaa bixinaaya Ceymiskaaga caafimaadka.

- Daryeelka asaasiga. Tusaale ahaan: dhaqtarka qoyska, dhaqtar ilkaha iyo jimicsiga (fysiotherapeut). Taasina adiga ayaa ballan ka sameysanaaya.
- Daryeelka gaarka ah. Tusaale ahaan:qabiir nafsiga, dhaqtarka dumarka ama dhaqtarka dhagaha cunaha iyo sanka KNO-arts. Kuwaasi waa inaad warqad laguu diray u heysataa. Dhaqtarkaaga ama dhaqtar ilkaha kuu diray.
- Daryeelka deg dega ee cisbitaalka. Tusaale ahaan: marka uu gacan kaa jabo ama si lama filaan wadnaha ka xanuunsato. Waxaad waceysaa nambarka gargaarka degdega ee 112. Taasi waa boliiska, dab demiska iyo ambalaansada bukaanka.

*Raadso dhaqtar qoyska*
Markaa waad hubtaa in dhaqtar adiga aad leedahay. Xitaa habeenkii iyo wiigendiga. Waxaad waceysaa dhaqtarkaaga qoyska. Wuxuu markaa ku siinayaa nambarka dhaqtarka kale ee shaqeynaaya ama goobta dhaqtarada (Huisartsenpost).

*Cisbitaalka hadaad toos u aado, iyadoo xanuun deg deg ah uusan jirin?*
Hadaad toos cisbitaalka u aado, adigoo xanuunkaaga uu gargaar deg deg ahayn? Markaa waa inaad Qeybta aad iska bixineyso (eigen risico) bixisaa caawinaada ay kuu qabteen. Mar mar waa inaad qarashka caafimaadka bixisaa. Ma ka shakineysaa inuu xanuunkaaga mid gar gaar deg deg yahay? Markaa wac dhaqtarkaaga qoyska ama goobta dhaqtarada si ay kuula taliyaan.

*Daryeel bulsho*
Shaqaalaha bulshada caawiya. wuxuu kaa caawini karaa dhamaan su'aalahaaga degaanka, daryeelka iyo waxbarashada. Weydii degmadaada warbixin dheeraad.

## Canshuuraha

Haddii aad Nederland degan tahay kana shaqeyso, waa inaad canshuuraha bixisaa la siinaayo Belastingdienst. Iyo canshuuraha degmada. Waxaa taasi loo shubaa wakaalada biyaha.

*Noocyada Canshuuraha ee jira Nederland markaad degan tahay*
- Canshuurta daqliga: haddii mushahar ama ceyr aad qaadato waxaa laguu soo diri Bixinta canshuurta.
- Canshuurta iibka ama btw: haddii aad shirkad leedahay Canshuuraha ganacsadaha.
- Canshuurta gaadiidka: haddii aad baabuur leedahay baabuur wadida Nederland.
- Canshuuraha degmada: haddii aad guri ijaarato ama gadato waxaad bixineysaa canshuur degmo (Canshuuraha degmada).

Warbixin dheeraad kala xariir Belastingtelefoon: 0800-0543. Ama fiiri belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch
Canshuuraha degmada waxaad kala xariireysaa degmadaada.

*Ganaax hadaadan Canshuuraha bixin weyso*
Haddii aad Canshuuraha bixinin, waa inaad ganaax bixisaa. Hadaad weli bixin weyso, ganaaxa waa sii kordhaayaa. Markaa badiyaa qarash dheeraad ayaa lagug soo dalacaayaa. Sida qarashka ganaaxa (incassokosten). Canshuuraha mushaharkaaga ayey la wareegi karaan. Ama alaabtaada. Wac wixii warbixin dheeraad Belastingtelefoon: 0800-0543. Ama fiiri belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch.

## Qarashka dheerida iyo waxa laguu soo celinaayo

Nederland dadka daqligooda yar yahay waxaa la siiyaa qarash dheeri ama kabis ah. Noocyo kala duwan oo qarshka dheerida ayaa jira:

- Kabida ijaarka Markaa ijaarka ayaa si fudu u bixin kartaa.
- Lacagta caruurta (Kinderbijslag): Lacagtaan alaab ayaa. Caruurta ugu soo gedi kartaa. Tusaale ahaan: dharka. Ama baaskiil.
- Kabida caafimaadka. Marka uu daqligaaga yar yahay Ceymiska caafimaadka si aad uga bixiso.
- Kabida qarashka caruurta la haayo (kinderopvangtoeslag). Markaasoo aad Xanaanada caruurta si fudud u bixin karto.

Ku shaqey sidii qarashka dheerida in bankigaaga laguugu soo shubo. Markaa aan loo shubin xisaabta qofka aad u shaqeyso, ama xafiiska shaqada ama kireeyaha guriga.
Warbixin dheeraad kala xariir Belastingtelefoon: 0800-0543. Ama fiiri belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch
Waxaad kaloo fiirin kartaa toeslagen.nl. Halkaa waxaa ku qoran keliya warbixin luqada Nederlaanka.

**Iska jir: maka tegeysaa Nederland?** Markaa jooji kharashka dheerida. Haddii kale waa lagu ganaaxayaa.

**Goormaa waajib kugu tahay inaad Nederland ka baxdo?**

Xaqa aad Nederland ku joogto wuxuu kaa dhacayaa marka:

- aadan ka soo bixin sharuudaha shrcigaaga deganaanshaha. Tusaale ahaan: waxaad heysataa shrci daganaansho inaad Nederland ka shaqeyso markaa shaqada ayaa lagaa saaray. Ama waxaad heysataa sharci deganaansho inaad xaaskaaga la joogto markaa waa is fureysaan.
- qarash aad ku nooolaato oo kugu filan ma heysatid.
- aad culeys badan ku sameyneyso daryeelka bulshada ee ceyrta.
- aad dembiyo kiriminal aad gashay.

Sidoo kale fiiri ind.nl.

## Dadka oo si kala duwan loola dhaqmo ama midabtakoor

Waxaa dastuurka Nederland ku qoran xaquuqda asaasiga ee sharciga. Sharcigan dhamaan dadka Nederland jooga wuu saameeyaa. Tusaale ahaan: dhamaan dadka shaqeeya isku xaquuq ayey leeyihiin. Markaa haddii aad heshiis muddo heysato ama waxaad shaqeysaa qeyb waqtiga ah? Markaa xaquuq isla mid ayaa leedahay qofka heysta heshiis joogto aha ama si buuxda u shaqeeya.
Ma dooneysaa inaad arrin wax dheeraad ka ogaataa? Dastuurka Nederlaanka iyo waxyaalaha kale ee qiimaha leh? Waxaad ka soo degsan kartaa prodemos.nl/voor-gemeenten/burgerparticipatie2/toolbox-participatieverklaring/download-materialen-gratis. Qoraalkan wuxuu ku qoran yahay luqado kal duwan. Tusaale ahaan Isbaanishka, Faransiiska, Inglishka iyo Jarmalka.

Ma dareemeysaa Dadka oo si kala duwan loola dhaqmo ama midabtakoor? Markaa waxaad ashtako ka gudbin kartaa Guddiga xaquuqda bani'aadamka (College voor de Rechten van de Mens). Taasi waa lacag la'aan. Wac 030-7511001. ama waxaad e-maalka u dirtaa info@mensenrechten.nl. Waxaad kaloo la xariiri kartaa qeybta midabtakoorka ee degmadaada antidiscriminatievoorzie-ning (ADV).




# Warbixin dheeraad iyo caawinaad

| Su'aalo ama gudbin ku saabsan | Urur | Telefoonka | Websaaytka |
|---|---|---|---|
| Iska qoritaanka degane ahaan, sharciyada, nidaamyada | Dowladda(Rijksoverheid) | 1400 ama +31-77-4656767 | rijksoverheid.nl |
| Ceymiska caafimaadka iyo Qeybta aad iska bixineyso | Leenka ceymis daryeelka (Zorgverzekeringslijn) | 0800-6464644 ama +31-88-9006960 | zorgverzekeringslijn.nl/coming-from-abroad |
| Mushaharkaaga Intee ayaa ugu yaaraan shaqeysan kartaa? | Dowladda (Rijksoverheid) | 1400 ama +31-77-4656767 | rijksoverheid.nl |
| Shahaadooyinka ama cadeymada | Nuffic | 070-4260260 | nuffic.nl/en |
| Shahaadooyinka ama cadeymada in la aqoonsanaayo | Ururada Wadashaqeynta ee Shaqooyinka shaqo waxbarashada ee xafiisyada ganacsiga (Stichting Samenwerking Beroepsonderwijs Bedrijfsleven, SBB) | 088-3380000 | s-bb.nl/en |
| Soo gudbinta xaaladaha xun ee shaqaalaha iyo marka la miiranaayo | Baaritaanka (Inspectie SZW) | 0800-5151 ama +31-70-3335678 | inspectieszw.nl |
| Kalsoonida xafiiska shaqada | Ururka guud ee xafiisyada shaqada (Algemene Bond Uitzendondernemingen, ABU)<br>NBBU | 020-6558255<br>033-4760200 | abu.nl<br>nbbu.nl |
| Warbixinta qofka aad u shaqeyso, is qoritaanka ganacsade ahaan | Rugta Ganacsiga (Kamer van Koophandel) | 0900-1234567 (€ 0,70 daqiiqadii) | kvk.nl |
| Sharuudaha shaqaalaha ee cao | FNV (iskaashatada shaqaalaha Nederland)<br>CNV (ururkaa kirishtanka ee shaqaalaha) | 088-3680368<br>030-7511001 | fnv.nl/contact<br>cnv.nl |
| Ceyrta | UWV waaxda ceyrta bixisa (uitkerende instantie) | 0900-1234567 (€ 0,70 daqiiqadii bilowgana waa € 0,045) | uwv.nl |
| Canshuuraha, kabida | Canshuuraha (Belastingdienst) | Telefoonka canshuuraha (Belastingtelefoon): 0800-0543 | belastingdienst.nl/english ama belastingdienst.nl/deutsch |
| Wadida baabuurka Nederland, taargada | Adeega Dowladda ee arrimaha jid/gaadiidka (Rijksdienst voor het Wegverkeer, RDW): | 0900-0739 (€ 0,10 daqiiqadii) | Warbixin inglishka rdw.nl/englishinformation |
| Lacag yar ay ku siiyaan xafiiska shaqada | Ururka ku dhaqmida CAO ee xafiisyada shaqada (Stichting Naleving CAO voor Uitzendkrachten, SNCU) | 0800-7008 | sncu.nl |
| Baabuur aad soo geliso, Canshuurta gaadiidka:iyo bpm | Canshuurta baabuurka (Belastingtelefoon Auto) | 0800-0749 | belastingdienst.nl/auto |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Midabtakoor iyo si ka duwan laguula dhaqmo | Guddiga xaquuqda bani'aad-amka (College voor de Rechten van de Mens) | 030-8883888 | mensenrechten.nl |



**Warbixin dheeraad**
Warbixin dheeraad:
newinthenetherlands.nl iyo rijksoverheid.nl.

Ministerie van Sociale Zaken en Werkgelegenheid
Postbus 90801 | 2509 LV Den Haag

*Qoraalkan waxaa lagu sameeyey qaab aad u taxadar weyn loona soo xulay Haddii ay qaladaad ku jiraan ku saabsan waxa ku qoran qoraalka Wasaaradda Arrimaha Bulshada iyo shaqo gelinta (Ministerie van Sociale Zaken en Werkgelegenheid) wax mas'uuliyad looma saari karo. Waxa ku qoran qoraalkana wax xaquuq laguma doonan karo.*
*Waxaa lagu soo qoray sharciyada jirey 1 janaayo 2016.*

Juni 2016 | Somali